homeforward

## Furitaanka Liiska Sugitaanka ee Foojarka Kala doorashada Guryaha (Section 8)

## Waxa Aad u Baahan tahay In aad Codsato iyo Su'aalaha Inta Badan La Isweydiiyo

**Waxa aad u baahan tahay in aad codsato ee loogu talagalay liiska sugitaanka ee Foojarka Kala doorashada Guryaha (Section 8) ee Home Forward:**
Codsiyada waxaa la aqbali doonaa iyaga oo internet-ka ah kaliya, marka waxaad u baahan doontaa in aad isticmaasho kambiyuutar ama qalabka gacanta 'mobile device' oo laga geli karo internet-ka. Fadlan oggolow 15 daqiiqo oo ah waqti aan carqalad lahayn si aad u buuxiso codsiga dhanka internet-ka.

Waa in aad haysataa macluumaadka soo socda oo diyaar ah si aad u gudbiso:

1. Magacyada buuxa ee dhammaan xubnaha qoyska ka tirsan.
2. Taariikhda dhalasho ee dhammaan xubnaha qoyska ka tirsan
3. Lambarka Social Security-ga ee dhammaan xubnaha qoyska ka tirsan. Haddii aadan lahayn lambarka Social Security-ga weli waad codsan kartaa, fadlan hoosta ka fiiri tilmaamaha la raacayo oo dheeraad ah. (#13)
4. Cinwaanka boosta – Kani wuxuu noqon karaa cinwaanka aad hada degan tahay ama cinwaanka joogtada ah ee aad sida caadiga ah warqadaha ku hesho
5. Cinwaanka boosta ee hay'ada ama qofka taageerada ku siiya (waajib maaha).
6. Macluumaadka dakhliga, oo ay ka mid yihiin halka laga helo iyo tirada dakhli ee xubin kasta oo qoyska ka mid ah.
7. Cinwaanka e-mailka ama lambarka telefoonka hada la haysto. ***

**** **Fadlan ogow:** Waxaa lagaaga baahnaan doonaa in aad koonto ka sameysato nidaamka dhanka internet-ka wax lagu codsanayo adiga oo isticmaalaya email ama lambarka telefoonka kaasi oo uu la socdo password-kaaga aad dooranayso.*

1. **Goorma ayaa liiska sugitaanka ee Foojarka Kala doorashada Guryaha (Section 8) ee Home Forward la furi doonaa?**
   Liiska sugitaanka ee codsiyada dhanka internet-ku waxay furmi doonaan 8:00 subaxnimo Isniinta Juun 5, 2023. Dhammaan codsiyada dhanka internet-ka waa in la buuxiyaa sidoo kalena la gudbiyaa ka hor 11:59 habeenimo Jicmaha, Juun 9, 2023.

2. **Sideen u dalbadaa?**
   Booqo website-kayaga, www.homeforward.org. Waxaad codsiga dhammaantii ka buuxin kartaa sidoo kale ka gudbinta kartaa dhanka internet-ka, isaga oo sida caadiga ah qaata waqti ka yar 15 daqiiqo.

3. **Maxaa dhacaya haddii aanan haysan kambiyuutar ama aanan geli karin internet-ka?**
   Waxaad wici kartaa khadka liiska sugitaanka ee Home Forward wixii la xiriira caawimaada gelinta codsigaaga ee nidaamka dhanka internet-ka.

4. **Codsiga dhanka internet-ka ma la helayaa isaga oo luqaddo kale ku qoran?**
   Codsiga dhanka internet-ka waxaa la heli doonaa isaga oo ku qoran Ingiriisi, Isbaanish, Soomaali, Af-Ruushka, iyo Vietnamese. Wixii la xiriira luqadaha kale, fadlan hoosta ka akhri tilmaamaha la raacayo oo dheeraad ah.

5. **Kani ma nidaam sida loo soo kala horreeyo, la iskugu adeegaa?**
   Maya, dhammaan codsigada la helay inta lagu jiro taariikhaha furitaanka liiska sugitaanku waxay yeelan doonaan fursad isku mid ah oo lagu soo xusho. Waxaan dhammaan codsiyada gelin doonaa bakhtiyaanasiib, iyada oo codsiyada u horreeya ee dhan 2,000 ee sida nasiibka ah loo soo xushay la gelin doono liiska sugitaanka ee Foojarka Kala doorashada Guryaha (Section 8).

6. **Fursadahaygu ma kordhi doonaan haddii aan codsado wax ka badan hal mar?**
   Maya, qoys kastaa wuxuu haystaa fursad ay hal mar oo kaliya ku codsadaan. Codsiyada isku mid ah waa laga saari doonaa bakhtiyaanasiibka.

7. **Sidee baan booska aan ku leeyahay liiska sugitaanka ee Foojarka Kala doorashada Guryaha (Section 8) loo go'aamin doonaa?**
   Haddii aad tahay mid ka mid ah 2,000 ee codsi ee sida nasiibka ah loo soo xushay ee la geliyay liiska sugitaanka, booskaaga aad kaga jirto liiska waxaa lagu go'aamin doonaa lambarka laguu qoondeeyay ee ku jirta nidaamka bakhtiyaanasiibka. Si kastaba ha ahaatee, marka aan ka soo qaadano liiska, xulashada mudnaanta la siinayo ee loogu talagalay Foojarada Kala doorashada Guryaha (Section 8) ayaa la siin doonaa dadka ka shaqeysta, loo shaqaaleeyay in ay ka shaqeystaan, ama waxbarashada ama tababarka ku helaya Degaanka Multnomah dhexdiisa, Oregon.

8. **Waa maxay nidaamka marka codsigayga la gudbiyo?**
   Dhammaan codsiyada u qalma waxaa la gelin doonaa bakhtiyaanasiibka waxaana loo qoondeyn doonaa lambar iyada oo la adeegsanayo hab si nasiib ah loo soo xushay. Lambarrada 1 ilaa 2,000 ayaa la gelin doontaa liiska sugitaanka si ay u helaan Foojarka Kala doorashada Guryaha (Section 8) labada ilaa saddexda sano ee soo socda. Codsiyada lambarrada sida nasiibka ah la iskugu qoondeeyay ee 2,001 iyo ka sarreysa lama gelin doono liiska sugitaanka.

Codsadayaasha oo dhan waxaa lagu soo ogeysiin doonaa qoraal ahaan xaalada liiskooda sugitaanka muddo ku beegan Sibtambar 2023. Haddii lagu geliyo liiska sugitaanka waxaad awoodi doontaa in aad soo wacdo Khadka Booska Liiska Sugitaanka 503-415-8000 ama gal nidaamka ka dib Sibtambar 2023 si aad u ogaato booskaaga ku jira liiska sugitaanka.

9. **Sidee baan u ula socodsiiyaa Home Forward haddii uu cinwaankaygu isbeddelo ka dib marka aan gudbiyo codsigayga?**
Waxaan u baahanahay in aan awoodno in aan kugula soo xiriirno boostada si aan u bixino caawimaad. Had iyo jeer qoraal ahaan ugula soo socodsii Home Forward isbeddelada ku yimaada cinwaankaaga ama macluumaadka lagaala soo xiriirayo muddo 10 maalmo shaqo gudahood ah laga bilaabo marka isbeddelku dhaco. Fadlan ogeysiinta qoraalka ah ee isbeddelada la xiriirta ku soo dir boosta Mareykanka ama adiga oo gacanta ku sida u keen Home Forward, Attention: Rent Assistance, 135 SW Ash St., Portland, OR 97204. Waxaad sidoo kale isbeddeladaada fax ugu diri kartaa 503.802.8330 ama email u dir waitlistinfo@homeforward.org.

10. **Yaa xaq u leh gargaar?**
Barnaamijka Foojarka Kala doorashada Guryaha (Section 8) wuxuu u adeega dadka iyo qoysaska sameynaya dakhli hooseeya ee u baahan in ay iska bixiyaan ijaarkooda. Si loogu qalmo:
- Dakhliga gurigaagu waa in uu yahay 50% ama ka hooseeyo heerka dakhliga dhexdhexaadka ah ee degaanka ee loogu talagalay tirada qoyskaaga. Fiiri bogga soo socda ee Su’aalaha Inta Badan La Isweydiiy ee xaddadka u yaala dakhliga.
- Waa in ay da’daadu tahay 18 jir ama ka weyn tahay waqtiga arjiga la codsanayo ama aad ka baxday xaaladdii dhalinyaranimo (aad ka xor noqotay dhalinyaranimadii) adiga oo guursaday ama amar maxkamadeed oo hore awgeed.
- Xubin ka tirsan qoyskaagu waa in uu yahay muwaadin sharci ah ama qof muhaajir ah oo u qalma.

11. **Qoysaska leh xubnaha qoyska ee aan sharciga lahayn ma u qalmi doonaan?**
Haa, ilaa iyo inta ugu yaraan mid ka mid ah xubin ka tirsan qoysku leeyahay qof degan oo u qalma ama xaalada muwaadinimo oo sharci ah.

12. **Ma in aan deganahay baa Degaanka Multnomah si aan u codsado?**
Maya, qof kasta ayaa codsan kara. Si kastaba ha ahaatee, haddii aad Foojarka Kala doorashada Guryaha (Section 8) ka hesho Home Forward, waa in aad ku isticmaashaa Degaanka Multnomah dhexdiisa 12 bilood ee u horreeya. Intaasi waxaa dheer, qoyska ku nool, ka shaqeysanaya, loo shaqaaleeyay in ay ka shaqeystaan, ama waxbarashada ama tababarka ku helaya Degaanka Multnomah dhexdiisa, Oregon, ayaa heli doona doorbidida liiska sugitaanka waxaana dhici karta in ay waqti hore helaan caawimaada bixinta ijaarka.

13. **Maxaa dhacaya haddii aanan lahayn lambarka Social Security-ga iyada oo sababtu tahay xaaladayda muhaajirnimo?**
Codsiga dhanka internet-ka waa mid mas'uulka guriga uga baahan in uu geliyo lambarka. Haddii mas'uulka guriga aanu lahayn lambarka Social Security-ga, waa in aad meesha banaan gelisaa lambar xiriir ah oo sagaal ah: 999999999. Fadlan ha isticmaalin lambaro kale ama lambarka social security-ga oo aan sax ahayn. Meesha loogu talagalay lambarada social security-ga ee xubnaha kale ee qoyska ka tirsan waxaa la dhaafi karaa iyaga oo banaan.

14. **Maxaa dhacaya haddii aanan lahayn lambar telefoon?**
<u>Sameynta koonto</u>: Waxaa lagaaga baahnaan in aad sameyso koonto adiga oo isticmaalaya cinwaankaaga email-ka ama lambarkaaga telefoonka ka hor inta aadan gudbin karin codsigaaga. Haddii aadan lahayn lambar telefoon ama cinwaanka email-ka, waxaad u baahnaan doontaa in aad sameysato cinwaanka email-ka. Koontada email-ka oo lacag la'aan ah ayaa laga sameysan karaa Gmail.com, Outlook.com ama Yahoo.com.

<u>Buuxinta codsigaaga:</u> Waxaad gelin kartaa lambar telefoon oo ku meel gaar ah ama lambar telefoon oo uu leeyahay saaxiib ama qaraabo. Tani waa meel bannaan oo la iskaga baahan yahay, markaa haddii aadan haysan wax lambar teleloon ah oo aad geliso, lambarka sagaal waxaad sagaal jeer gelisaa meesha banaan. (999) 999-9999.

15. **Codsiga dhanka internet-ka ma la joojin karaa?**
Haa, codsiga dhanka internet-ku wuu is jari doonaa haddii wax hawl ah la qaban waayo 15 daqiiqo oo xiriir ah waxayna noqonaysaa in aad dib u bilowdo. Codsigu ma noqonayo mid dhammeystiran ilaa aad ka helayso bogga xaqiijinta.

16. **Sidee baan ku ogaan doonaa in codsigayga la gudbiyay sidoo kalena la aqbalay?**
Haddii aadan nidaamka wax lagu codsanayo ka samaysan magac aad ku gelayso iyo password, waxaa lagaaga baahnaan doonaa in aad taasi samayso ka hor inta aan codsigaaga la aqbalin. Marka arji codsi oo la buuxiyay la gudbiyo waxaad heli doontaa lambarka xaqiijinta iyo email xaqiijin ah oo toos ah oo loo soo diro cinwaanka email-ka ee aad u isticmaasho galidaada.

17. **Ma filaysaa in nidaamka la isticmaalayo culays saarmo iyada oo ay la xiriirto tirada dadka ee isku hal mar codsan doona?**
Waxaan filaynaa in aan helno tiro badan oo codsiyo ah, anaga oo qalabaynay nidaamkayaga kaasi oo loogu talagalay dadka badan ee soo booqanaya inta lagu jiro wakhtiga uu liiska sugitaanku u furan yahay. Waxaan ku dhiiri gelinaynaa in codsadayaashu ay buuxiyaan foomkooda internetka ka hor Juun 9-keeda si ay iskaga ilaaliyaan suurtagalnimada in daqiiqada u dambeysa is dhex yaac yimaado.

18. **Haddii aan hayo su'aal ku saabsan nidaamka codsiga, ayaan la xiriiri karaa?** Waxaan haysan doonaa dad diyaar u ah in ay kugu caawiyaan telefoon ahaan marka la gaaro Juun 5-teeda – Juun 9-keeda. Waxaad soo wacdaa khadkayaga caawimaada: 503-415-8050, Isniinta ilaa Jimcaha inta u dhaxaysa 8:30 subaxnimo iyo 4:30 galabnimo.

19. **Sidee baan u heli karaa caawimaad la xiriirta nidaamka codsiga haddii aan qabo naafanimo dhanka jirka ama aragga ah sidoo kalena aanan awoodin in aan gelo ama isticmaalo kambiyuutar?**
Haddii ay suurtagal tahay, waxaan kugu dhiiri gelinaynaa in aad yeelato adeeg bixiye, saaxiib ama xubin qoyska ka tirsan oo kaa caawiya gudbinta codsigaaga dhanka internet-ka. Khadka wuxuu sidoo kale yeelan doonaa shaqaale la heli karo oo kaa caawiya buuxinta codsiga dhanka internet-ka. Haddii codsiga dhanka internet-ka uu yahay mid aadan heli karin adigu codsi warqad ah ayaa laguu soo diri karaa.

20. **Waxaan qabaa naafanimo ama waxaa i haysta caqabad dhanka luqadda ahi waxaanan rabaa in aan gudbiyo codsi warqad ah, maxaan sameeyaa?**
Wac khadka iyada oo shaqaalaha la heli doono in ay ka caawiyaan codsiga dhanka internet-ka. Waxaanu rabnaa in aanu kaa caawino in aad codsigaaga ku buuxiso telefoon ahaan si loo xaqiijiyo in qof kastaa buuxiyo wakhtiga kama dambeysta ah ee loo qabtay. Waxaan sidoo kale yeelan doonaa adeegyada turjumaad oo la helayo si ay gacan uga geystaan buuxinta codsiga.
Codsiyada oo warqad ah ayaa la bixin doonaa marka la dalbado kaasi oo loogu talagalay dadka qaba naafanimada, u baahan turjumaad, ama ay la soo deristay nooc kale oo caqabad oo la xiriirta ka codsashada dhanka internet-ka. Halkan waxaa ku qoran waxa ay tahay in aad yeesho:
- Wac 503-415-8050 si aad u codsato in codsi warqad ah boosta laguugu soo diro
- Codsiyada warqada ah ayaa la heli doonaa iyaga oo ku qoran Ingiriisi, Af-Ruushka, Isbaanish, Soomaali iyo Vietnamese.
- **Codsiyada warqada ah waa in ay ku taalaa shaabad taariikhdeedu tahay ama ka horayso Juun 9, 2023 si loogu qalmo.** Codsigaaga boosta ugu soo dir Home Forward, 135 SW Ash Street, Portland, OR, 97204. Attention: Rent Assistance.

21. **Maxaan sameeyaa inta aan sugayo in magacaygu liiska halka sare ka soo galo?**
Nala soo socodsii haddii macluumaadka meesha lagaala soo xiriirayo iyo qaabka gurigaagu u dhisan yahay isbeddelaan. Xiriirkeena u horreeyaa wuxuu noqon doonaa boos ahaan. Haddii aan kuu soo dirno warqad oo la soo celiyo, magacaaga waa laga saari doonaa liiska sugitaanka. Sidoo kale u fiirso warqadaha u baahan in aad ka soo jawaabto. Waxaan si joogta ah u dirnaa warqado codsadayaasha weydiinaya in ay weli danaynayaan in ay ku jiraan liiska sugitaanka. Haddii aadan ka soo jawaabin warqadda, magacaaga waa laga saari doonaa liiska.

Waxaan sidoo kale codsadayaasha kula talinaynaa in ay bishiiba mar fiiriyaan booskooda ay kaga jiraan liiska sugitaanka iyaga oo gelaya nidaamka ama wacaya 503-415-8000.